# OGOLAANSHAHA XASUUSIN DABACSAN EE WAALIDKA U SOCOTA QORSHAHA TIRAKOOBKA ARDADA DUGSIGA DEGMADA
## 2013 Tirakoobka Ardada Minnesota

Dugsigeena wuxuu ardada dhigata darajoyinka 5aad, 8aad, 9 aad iyo 11aad ka codsanyaa iney ka qeybqaataan Tirakoobka Ardada Minnesota 2013. Tirakoobkaan wuxuu saddexdii sanaba gebi ahaan ka dhici doonaa dugisyada gobalkeena.

Tiradkoobkaan waxaa loo bixiyaa si loo helo warbixin fiican waxa ay ku sugan yihiin ardada markay dugsiyada joogaan, sida ay ula dhaqmaan kuwa kula da'aada ah iyo fikradaha ay ka qabaan dabciga iyo caafimaadka. Aqbaarta waxey naga caawineysaa sidaan u dhisi lahayn una wadi lahayn qorshe waxtaraya iyo inaan adeegyo fiican ka bixinno dugsiyada iyo xubanaha jaaliyadaha. Aqbaarta gudahaaneed ee gobolka waxey caawinayaan meelmarinta barnaamijyada gobolka. Markaan waxrbixinta helno wixii ka dambeeya xilliga kuleylaha, aqbaarta aan ka helno ardada deegaankeena waxaan la wadaagi doonaa shaqaalaha dugsiga, ardada, waalidiinta iyo jaaliyadda.

Dugsiga degmadeena wuxuu waalidka u sheegay iney jiraan tirakoobyo noocas ah ee horay u dhacay haddana uu jiro sharci feederali ah oo dhahaya waa in waalidka lala socodsiiya haddey jiraan arrimo noocas ah. Tirakoobka waxaa ku jira su'aalo bareer ah oo ku saabsan waxyaabo quseeya nolosha dhalinyarada. Kuwaani waxaa kamid ah isticmaalka qamriga iyo maqaadarad kale, amniga ka jira dugsiyada iyo agagaarkooda, isbortiga iyo nafaqada, caafimaadka maskaxdka iyo dareemka (kadeed, kaa jajabantahay) dhaqan xumid iyo ficilo sharci darra ah (tuugo, isticmaalka maandooriyada, dagaal aloosid), iyo sida ay diinta u saameyso arrimaha qaaska ah. Su'aalaha ku saabsan galmada iyo wixii la halmaala waxaa la weydiin doonaa oo keliya ardada dhigata darajooyinka 9aad iyo 11aad. Ardada haddeysan wax luga ku lahayn waxqabadkaa, waa ka gudbi karaan su'aalahaas oo markaasi ay u gudbaan qeybta ku xigta. Tirakoobka wuxuu ka wareysanayaa sida ay u fiicnaantahay xaaladda dugsiga, qorshoyinka mustaqbalka, sida ay waqtiga ku dhammeystaan kuwa ay da'aadoodu yartahay, iyo sida uu dugsiga, qoyska iyo jaaliyadda ay u taakuleyaan.

Tirakoobku waa mid magic la' oo qarsoodi ah. Ardada lama weydiinayo magacyadooda, nambarka aqoonsiga ardayga, ama aqbaar kaloo qaas ah. Qofna ama qoyskoodaba laguma aqoonsan karo. Naatiijada oo idil waxaa loo gudbinayaa dugsiga degmada ee uu ardayga aado. Xogta ardayga waxey noqoneysaa mid difaacan.

Tirakoobka waa mid iskaa ah. Waxaad dooran kartaa ineysan wiilkaaga iyo gabadhaada ka qeybqaadan tirakoobka adigoo buuxiya soona celiya foomka hoose. Ardada waxey dooran karaan iney diidan tirakoobka qeybo kamid ah tirakoobka ama tirakoobka oo idil iyo in lahaansha fursaddaas ay u sheegi karaan shaqaalaha.

Waxaan kugu soo dhoweyneynaa inaad eegtid koobiga tirakoobka. Dhigashada ballanka, hoos eeg.

Taariiq(da/aha) la qaadi doono Tirakoobka Ardada Minnesota: _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ __ _ _ _ _ _

---

Haddey wax su'aal ah oo ku saabsan tirakoobka, la soo xiriir (qofka, telefoonka, email) _ _ _ _ _ _ _ _ _
Eegidda tirakoobka, la soo xiriir (qofka, telefoonka, email)_ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ _
+++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++++
Haddaad rabti inuu wiilkaaga ama gabadhaada aysan ka qeybqaadan tirakoobka, fadlan xasuusintan buuxi:

Magaca ardayga ______________________________Dugsiga ardayga ______________Darajada ______,

Codsigeyga waa inuusan ka qeybqaadan 2013 Tirakooba Ardada Minnesota.

Magaca (far weyn) ___________________________Waxa aad arday u tahay: ____________________

Saxiixa ___________________________________Taariiqda: ______________________________________

Xasuusintaan u soo celi: (magaca, dugsiga, cinwaanka) _ _ _ _ _ _ _ _ _ _ marka (taariqda) _ _ _ _ _ _ _ _ _